# Independent Living Supports Pilot (Taageerada Tijaabinta Nolosha Madaxabannaan) Buugyareha Ka-qeybqaataha Barnaamijka

(Independent Living Supports Pilot Program Participant Handbook)

Wisconsin Department of Health Services
Division of Public Health | P-03473BSO (04/2024)

**Tusmada Qoraalka**

**Faahfaahinta Barnaamijka Independent Living Supports Pilot (Taageerada Tijaabinta Nolosha Madaxabannaan ama ILSP)** .... **4**

Jadwalka barnaamijka .... 4

Waajibaadka ka-qeybqaataha .... 4

**Diiwaangelinta** .... **5**

Codsiga .... 5

Daraasadda Hore ee Tijaabinta ILSP .... 5

Aqoonsiga baahida .... 5

Kharashaadka la oggolyahay .... 6

Qorshaha Adeegga .... 7

**La-socosho** .... **11**

Ogaanshaha miisaaniyadda .... 11

Cusbooneysiinta qorshaha adeegga .... 11

Taleefan laguu soo dirayo .... 11

Xiriirka dadku bilaabaan .... 12

Habraaca kalaguurka .... 12

Dhammaadka barnaamijka .... 12

Ka-saarista diiwaangelinta .... 12

**Codsiyada Kordhinta Wakhtiga Diiwaangelinta** .... **13**

**ILSP Connect Portal (Kadinka Intarnetka ILSP)** .... **13**

Waa in ay dadku arkaan .... 13

Isticmaalidda ADRC .... 13

Helitaanka shaqaalaha .... 13

**Qiimeynta Barnaamijka ILSP** .... **14**

**Cabashada iyo Dacwooyinka** .... **14**

**Ka-hortegidda Takrifalka Miisaaniyadda iyo Lunsashada Lacagta** .... **14**

**Shuruudaha iyo Hawlgalka ADRC** .... **15**

Xogdhowrid .... 15

Xadeynta iyo joojinta adeegga guud ee ADRC .... 15

Helitaanka adeegyada waxqabadka dhibaatada ama xaaladaha degdegga ah .... 15

**Meelaha Lala Soo Xiriirayo** .... **16**

Sida Loola Soo Xiriirayo ADRC ........ 16
Sida loola xiriirayo maamulka xafiis kale oo saddexaad ........ 16
Sida Loola Soo Xiriirayo Wistech ........ 16
Sida loola xiriiri karo shaqaalaha adeegga ........ 16
**Lifaaqa A: Ereybixinta Qoraalka ........ 17**
**Lifaaqa B: Noocyada Adeegayada ........ 19**
Qeexid ........ 19
Noocyada adeegayada ........ 19
**Lifaaqa C: Tusaalaha Waraaqda Ogolaanshaha ........ 22**

# Faahfaahinta Barnaamijka Independent Living Supports Pilot (Taageerada Tijaabinta Nolosha Madaxabannaan ama ILSP)



Barnaamijka ILSP waa barnaamij tijaabo ah oo ay taageereyso Wisconsin Department of Health Services (Waaxda Adeegyada Caafimaadka ama DHS). Barnaamijka ujeedkiisu waa dadka aan hadda ku jirin barnaamijka daryeelka muddada-dheer ee Medicaid ee aan u baahneyn daryeelka muddada-dheer in lagu taageero marka ay ka faa'iideysan karaan muddo-gaaban, taageerid ah caafimaadka oo ay noloshooda u madaxbannaan yihiin. Taageerada iyo adeegyada ILSP waxaa loogu talagalay in lagu caawiyo dadka si ay bulshada ugu dhex jiraan si madaxbannaan muddo dheer iyo si shaqaalaha looga yareeyo dhibka hawsha. Dadka ka qeybgalaya waxaa laga bixin doonaa kharashka adeegyada iyo taageerada ee guriga gudihiisa ilaa $7,200 muddo gaareysa ilaa 12 bilood.

Aging and disability resource centers (Xarumaha tasiilaadka waayeelka iyo Naafada ama ADRCs) ayaa dadka ku jira ILSP ka caawin doona in ay u helaan tasiilaadka bulshada iyo sameyn ah qorshe adeeg oo ku saabsan baahidooda.

Xafiis saddexaad oo ah maamulka, Premier Financial Management, oo loo soo gaabiyo Premier, ayaa la soconaya diiwaangelinta dadka la qorayo, hubinta qofkii xaq u leh adeegbixiye, oggolaanshaha qorsheyaasha adeegga, bixinta lacagta, iyo in lala socdo maalgelinta dadka.

DHS waxay la shaqeyneysaa Jaamacadda Wisconsin—Madison si loo qiimeeyo sida fiican ee uu barnaamijka ILSP u shaqeynayo. Qiimeyntu waxa ay tixraaci doontaa daraasadda dadka iyo xogaha kale.

## Jadwalka barnaamijka

ILSP waa barnaamij tijaabo ah. Taas macnaheedu waa in hab ah qaab-fudud, oo ah muddo-gaaban ay DHS ku caawin doonto in ay ku ogaato waxa shaqeynaya iyo waxa aan shaqeyneyn. Barnaamijkan tijaabinta ah waxaa u qorsheysan in uu dhammaado 31ka Maaj, 2025. Inta lagu jiro tijaabinta, dadka la diiwaangeliyo waxa ay manaafacaadka helayaan ilaa hal sano, oo ma heli doonaan fursad ay ku cusbooneysiin karaan marka uu barnaamijku dhammaado.

## Waajibaadka ka-qeybqaataha

Marka aad ku jirto barnaamijka ILSP, waxaad masuul ka tahay in aad raacdo qorsheyaasha iyo habraacyada barnaamijka.

Buugyarehan ka-qeybgalaha ayaa qeexaya sida uu barnaamijku u shaqeynayo, oo waxaa ku qoran macluumaad ku saabsan sida loola shaqeynayo:

- Aging and disability resource centers (xarumaha tasiilaadka waayeelka iyo naafada ama ADRC).
- Premier Financial Management, waa xafiis saddexaad oo maamulaya barnaamijkan.
- Shaqaalaha adeegga, oo ay ku jiraan ururrada iyo shaqaalaha guriga yimaada ee aan xirfadlaha ahayn.
- Qiimeeyeyaasha barnaamijka.

# Diiwaangelinta

## Codsiga

Qof u shaqeeya ADRC ayaa kaa caawin doona in aad codsato barnaamijka ILSP. Foomka codsiga waxaa lagu ururinayaa macluumaadka shakhsiyeed iyo macluumaad ah sida dhaqaale ahaan iyo waxqabsi ahaan xaq loogu yeelan karo barnaamijka. Looma baahna waraaqaha dhaqaalaha ama caafimaadka marka la soo codsanayo ILSP.

Foomka codsiga ILSP waxa uu shaqaalaha ADRC ku caawin doonaa in ay ku go'aamiyaan sida aad xaq ugu yeelaneyso barnaamijka. Haddii aad ka soo baxdo shuruudaha oo aad ka qeybgaleyso, waa lagugu qori doonaa ILSP. Taariikhda diiwaangelinta barnaamijka ILSP waa taariikhda la isu oggolaado oo xaqa loo yeesho in la soo galo barnaamijka.

Shaqaalaha ADRC ayaa ku siin doona waraaqda diiwaangelinta ama marka laguu diido, oo waxay ku xiran tahay jawaabta codsiga.

## Daraasadda Hore ee Tijaabinta ILSP

Markaad isku diiwaangeliso barnaamijka, ADRC ayaa kaa caawin doonta in aad buuxiso Daraasadda Hore ee Tijaabinta iyadoo ujeedku yahay qiimeynta barnaamijka. Waa in aad ka soo jawaabto Daraasadda Hore ee Tijaabinta ka hor intaan qorshe laguu sameyn.

## Aqoonsiga baahida

ADRC waxay kugu caawineysaa inaad ogaato sida uu ILSP baahiyadaada wax laga qaban karo. ADRC waxa kale oo laga yaabaa inay ku siiso macluumaad aad ku sii heleyso tasiilaad kale oo wax looga qaban karo baahi kasta oo kale oo uusan barnaamijka ILSP wax ka qaban karin. ADRC waxay isticmaali doontaa macluumaadka aad ku buuxiso foomka codsiga iyo daraasadda tijaabinta inta lagu jiro habraaca.

ILSP waa maalgelinta wax bixineysa ugu-dambeyn, taas oo uu macnaheedu yahay in adeegyada lagu maalgelinayo lacagta ILSP oo keliya marka aan si kale looga heli karin Medicaid, Medicare, ama hay'ad kale oo gaar ah ama mid dowladeed oo masuul ka ah.
Independent Living Supports Pilot (Taageerada Tijaabinta Nolosha Madaxabannaan)
Buugyareha Ka-qeybqaataha Barnaamijka


## Kharashaadka la oggolyahay

Lifaaqa B waxa uu shaqaalaha ku caawin doonaa in ay ku go'aamiyaan sida aad xaq ugu yeelaneyso barnaamijka ILSP. Barnaamijka ILSP wuxuu kaa caawin karaa bixinta wax ama adeeg ah baahi la xiriira naafanimo ama wax nolosha kuu fududeynaya. ILSP ma bixin karto kharashaad la xiriira dayactirka guud ee guriga. Qof u shaqeeya ADRC ayaa kugu caawin kara macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan waxa uu barnaamijka ILSP kaa bixin karo iyo waxa aan lagaa bixin karin.

## Teknoolajiga caawinta iyo in wax lagaaga beddelo guri ama baabuur

ILSP waxaa loo isticmaali karaa assistive technology (teknoolajiga caawinta ama AT) iyo in wax lagaaga beddelo guri ama gaadiid. Mararka qaarkood qiime jaban oo lagu bixiyo AT iyo/ama in wax la beddelo ayaa wax weyn ka beddeli karta in ay dadku ku sii noolaadaan guryahooda. ADRC ayaa dadka kala shaqayn doonta in ay tixgeliyaan waxa la awoodi karo.

Marka qiimaha wax lagu beddelayo ee ah AT iyo guriga ama gaadiidka ka badan yahay $1,000, waa inay qiimeeyaan barnaamijka teknoolajiga caawinta ee Wisconsin, WisTech. ADRC waxay dadka ku caawineysaa in ay soo gudbiyaan caddeyn qeexeysa baahidooda iyo teknoolajiga ama waxa laga beddelayo ee ay rabaan. WisTech ayaa si toos ah dadka ula soo xiriiri doonta si ay ugu ballamiso qiimeynta, oo waxay 60 maalmood gudahood ku siin doonaan qoraal kooban oo ah qiimeyntooda.



Shaqaalaha WisTech ayaa sidoo kale aqoonsan doona haddii loo baahan yahay qiimeyn guud oo loo eegayo baahida dadka. Xaalado aadka u adag, WisTech waxa ay ku talin kartaa in la helo AT ama qiimeynta adeegsiga oo laga helo xarumaha nolosha madaxabannaan ama qiimeeyeyaal kale oo aqoon u leh.

Qiimeynta WisTech waxa ay bilaash u tahay dadka ku jira barnaamijka ILSP. Haddii qiimeynta AT ama adeegsiga qalabka ay soo sheegaan xarun si madaxbannaan loogu nool yahay ama qiimeeye kale oo ka baxsan barnaamijka WisTech, kharashka waxaa lagu bixinayaa lacagta qofka ee ILSP.

ILSP ma bixineyso AT ama wax kasta oo la beddelayo oo qiimahoodu ka badan yahay $1,000 haddii aysan taladaasi ka imaan qiimeynta.

## Qorshaha Adeegga

ADRC ayaa kula shaqeyneysa si aad u sameysato qorshe adeeg oo ku fiican baahidaada. Qorshaha adeegga wuxuu ka koobnaan doonaa waxyaabo iyo adeegyo gaar ah, qalab, qiyaasta kharashka, iyo waraaqaha biilasha. Kharashaadka la saadaaliyey uma baahna inay noqdaan kuwo sax ah, laakiin alaabta la soo iibsado waxaa laga yaabaa in aan la bixin wax ka badan inta ku qoran qorshaha adeegga. Waxyaabaha iyo adeegyada ku qoran qorshaha adeegga waa in lagu xiro baahida waxqabsiga.

ADRC waxay kaala shaqeyn doontaa in aad qorshaha adeega ee hore u gudbiso xafiiska Premier si loogu ansixiyo 30 maalmood gudahood laga bilaabo diiwaangelinta barnaamijka.

Shaqaaluhu waa in ay iska diiwaangeliyaa ILSP. Haddii uusan qof shaqaale ah iska diiwaangelin Premier, ADRC ayaa ku caawin doonta in ay baratanbarnaamijka ILSP iyo sida la isaga diiwaan geliyo. Waxaad kala shaqeyn doontaa ADRC oo diyaarineysa qofka saxda ah ee lagala xiriirayo xafiiska si loo sameeyo go'aamo oo loo saxiixo foomamka. Waxaa adkaan karta in la aqoonsado qofka lagala xiriirayo shaqaalaha dalkoo dhan, sida dukaamada waaweyn ee santuuqyada. ADRC ayaa aqoonsan karta meheradaha deegaanka ama goobaha kale ee la isaga diiwaangeliyo ILSP.

Looma baahna in lagu qoondeeyo miisaaniyadda ILSP oo dhan qorshaha adeegga bilowga ah. Waxa laga yaabaa in aad kala shaqeyso ADRC in dibu-eegis lagu sameeyo oo la cusbooneysiiyo qorshaha adeegga inta lagu jiro muddada oo ah 12 bilood.

Haddii aad rabto in aad iibsato wax ama adeeg qiimihiisu ka badan yahay miisaaniyadda ILSP, waxaad isticmaali kartaa lacagaha ILSP si aad ugu bixiso qeyb ka mid ah kharashka. Waa in aad soo qorto miisaaniyadda ILSP ee aad rabto inaad u isticmaasho qorshaha adeegga. Adigaa masuul ka noqon doona bixinta qeyb kasta oo ka mid ah kharashka ay kaa bixiso ILSP. Shaqaalaha adeegga si toos ah ayey kuugu soo dallacayaan kharashka ka soo hara hawsha ama adeegga ka dib marka uu barnaamijka ILSP bixiyo qeybtiisa.

## Diyaarinta shaqaalaha ilsp aan ahayn xirfadleyaal ee adeegga guryaha

Marar badan, waxaa kala shaqayn doontaa ADRC si aad u hesho xafiiska shaqaalaha adeegga ama qof kuu shaqeeya. Hase ahaatee, waxaa la dooran karaa shaqaalaha guriga oo aan ahayn xirfadleyaal, oo waxaa la yiraahdaa non-professional providers (shaqaale aan ahayn xirfadleyaal ama NPPs). NPPs waa asxaabta ama qoyska markay qaban karaan adeegyada qaarkood, intii arrintan hay'ad kale lagala shaqeyn lahaa. Lifaaqa B waxaa kuugu qoran noocyada adeegyada ay kuu qaban karaan dadka NPPs. Haddii aad shaqaaleysiiso shaqaale aan xirfadle ahayn, waa in aad magacooda ku dhex qorto qorsheha adeegga. ILSP ma tababarto dadka aad qoroto ee NPPs; hase ahaatee, waxaa laga yaabaa in ay ADRC soo jeediso tasiilaad waxbarasho ah haddii loo baahdo.

Haddii aad rabto inaad isticmaasho NPP, adigaa masuul ka ah qiimeynta aqoontooda shaqada. Adiga ayaa masuul ka ah dhibaatada sharciga ah ee la xiriira qorashada NPP si aad adeeg uga hesho. NPP waa qandaraasleyaal oo DHS, ADRC, iyo Premier ma qaadi karaan xilka goobta shaqada ee adeeg kasta oo ay maalgeliso ILSP.

## Xaqu-yeelaashada NPP

Markaad ku jirto ILSP, waxaa NPP ahaan kuugu shaqeyn kara qoyska ama saaxiib; hase ahaatee, shaqadoo dhan waa in ay si cad oo toos ah ula xiriirto daryeelka iyo taageerada. Saxiib ama qof qoyska ka mid ah oo kula nool wax lacag ah ILSP kuma siin karto nadiifinta guud ee guriga, xataa haddii aadan adigu awoodin in aad sameysato, sababtoo ah waxay ka tirsan yihiin qoyskaaga oo iyaga ayaa ka faa'iideysanaya in hawshii gurigooda loo qabto. Taas beddelkeeda, qofka qoyska ka midka ah waxaa lacagta ILSP lagu siin karaa marka uu kuu qubeeyo ama markuu dharka kuu soo meyro, haddii aad u baahan tahay in hawlahaas lagaa caawiyo, oo waa wax loo arko in ay gaar kuugu yihiin baahiyo laguu aqoonsan karo.

Dadka ku jira barnaamij ah ILSP uma shaqeyn karaan sidii shaqaale aan xirfad lahayn. Taas macnaheedu waa in aadan dooran karin qof ah shaqaalaha NPP ee ILSP haddii uu qofkaasi isaguba ku jiro barnaamijka. Waxa kale oo ay la macno tahay in aan lagu siin karin shaqo ah NPP marka ay adiga dan kale kuugu jirto lacagta ILSP.

Qofna lacagta ILSP laguma siin karo shaqaale ah NPP marka qofkaas la siiyo gunno daryeele oo aan xirfadle ahayn sida Alzheimer's Family and Caregiver Support Program (Barnaamijka Taageerada Qoyska Bukaankoodu Xusuus-la'aan Hayso ama AFCSP) ama National Family Caregiver Support Program (Barnaamijka Taageerada Ururka Daryeeleyaasha Qoyska ee Dalkoo Dhan ama NFCSP).

## Baarashada Danbiyada ee shaqaalaha NPPs

Qofkii lagu helo danbi culus, sida uu dhigayo sharciga Wis. Stat. § 50.065, mushaar kama qaadan karo barnaamijka ILSP. Sida dadka ku nool goob ciqaabeed iyo kuwa lagu soo xukumay dil ah heerka koowaad ama labaad, faldambiyeed dil ah, caawin ah is-dilid, waxyeelleyn ah dadka, dhibaateyn jir ahaaneed oo lagula kaco waayeel ama ilma yar, dhibaateyn ah khatar in la geliyo dadka, dayacaad ah bukaan ama dad xarun ku wada nool, ama xadgudub ah galmo. Dadka ku jira ILSP, ADRC ayaa ku weydiin doonta in aad saxiixdo qirashada sharciyada barnaamijka.

Haddii ay shaqaale xafiis ka socda kuu qabtaan adeegyo taageero ah, xafiiska ayaa sameynaya baarashada qofka si loo soo hubiyo in uusan qofka shaqaalaha ah soo gelin dambiyo waaweyn.

Haddii aad rabto inaad ka hesho adeegyo shaqaale aan ahayn xirfadleyaal, DHS waxay kugula talineysaa inaad hesho baarashadooda danbiyada iyo aqoontooda ka hor intaysan shaqada kuu bilaabin. Baarashada waa wax u fiican dadka oo waxaa loogu talagalay badqabka shakhsi ahaaneed. Waxa kale oo ay dadka ka caawineysaa masuuliyadda.

Wakiilka qofka u qareemaya, masuul, ama wakiillada kale ee qofka ee raba in shaqada loogu mushaaro sida NPP **waa in** danbiyadoodii hore la soo baarto. Waa sharci u qoran barnaamijka oo waxaa la isku tuhmi karaa dano shakhsiyeed.

Waxaa Premier laga codsan karaa caawimaad ah baarashada qofka marka la shaqaaleynayo. Kharashka baarashada waxa bixinaya barnaamijka oo laguma dallaci karo miisaaniyadda ILSP ee qofka. Premier ayaa adiga iyo qofka NPP idiin soo sheegi doona natiijada ka soo baxda baarashada. Natiijooyinka waxaa sidoo kale lagu sheegi doonaa habka qoraalka ILSP. NPPs waa

in ay saxiixaan foom caddeynaya inaan lagu soo xukumin danbiyada waaweyn ee kor ku qoran iyo in ay u qalmaan oo ay mushaar ka qaadan karaan barnaamijka ILSP. Haddii baarashada qof shaqaale ah lagu soo helo dembi culus, Premier uma oggolaan doono lacag mushaar ah in laga siiyo ILSP. Waxaad ADRC kala shaqeyn kartaa inaad doorato qof ama xafiis kale si aad uga hesho adeegyo.

Haddii aad doorato in uu kuu shaqeeyo qof ah NPP oo ILSP ku hesho dambi weyn, adiga ayaa si toos ah masuul uga ah wixii lacag ah oo la siinayo shaqaalahaas.

### Tababarista iyo jadwalka shaqaalaha

Markaad ku jirto barnaamijka ILSP, adiga ayaa masuul ka ah tababarista qofka ama NPP iyo si ay si badqabid leh u shaqeeyaan. Waa inaad wax barto dadka ah NPP sida ay kuugu caawiyaan hawlaha dantaada. Waa inaad shaqaalaha barto guriga oo aad tusto meelaha aad wax ku keydsato wixii agab ah oo lagama maarmaan kuu ah sida gacmageliyada iyo alaabta nadiifinta.

Waxaa NPP loo sameynayaa jadwalka saacadaha shaqada la oggolaaday ee qorshaha adeegga. Waa in aad shaqaalaha u sheegto haddii wax laga beddelo jadwalka. Waa in aad sameyso qorshe ah gurmad haddii shaqaaluhu ku imaan waayo wakhtigii shaqada.

### Miisaaniyadda iyo heerarka mushaarka

Waxaad ADRC kala shaqeyn doontaa in aad go'aamiso tirada saacadaha, heerka mushaarka, iyo muddada shaqada ee NPPs. Waa in aad tixgeliso nooca shaqada la qabanayo iyo miisaaniyadda ILSP markaad sameyneyso qiimaha saacadaha adeegyada. Mushaarka lagu talinayo ee NPP waa $10.00 ilaa $25.00 saacaddii. Qiimaha mushaarka ee shaqaalaha oo dhan waa in uusan ka badan heerka caadiga ah ee ay shaqaaluhu ku shaqeeyaan marka ay qabanayaan hawlo la mid ah.

### Manaafacaadka ceymiska shaqaalaha

Dadka ILSP lagama rabo in ay bixiyaan ceymiska magdhowga shaqaalaha ama bixinta ceymis kasta oo kale. NPPs uma qalmaan manaafacaadka shaqaalaha ee barnaamijka ILSP.

## Waraaqaha qaansheegadka

Shaqaalaha ayaa masuul ka ah in ay qaansheegadka Premier u soo diraan wakhti sax ah. Barta intarnetka ILSP ee Premier ka eego macluumaadkii ugu dambeeyey iyo taariikhaha lacagbixinta. Adiga ayaa la xiriiri kara Premier haddii ay jiraan dhibaato ah bixinta qaansheegadka.

## Sharciga badqabista iyo caafimaadka ee 40ka saac

Si loo yareeyo khatarta badqabista ee barnaamijka ILSP, shaqaaluhu waa in aysan shaqeyn wax ka badan 40 saacadood toddobaadkii. Ugu badnaan 40-saac waa toddobada maalmood ee shaqada, oo, si loo waafajiyo barnaamijka ILSP, bilowgu waa Axadda 12ka saqda dhexe ilaa iyo Sabtida 11:59 habeenimo. Waxaa kuu shaqeyn kara shaqaale badan si aad u daboosho baahidaada adeegyada, wixii muhiim ah, base shaqadu waa ugu badnaan 40-saac toddobaadkii. Mushaarka saacadaha dheeraadka ah looma oggola barnaamijka ILSP.

## Lacagcelinta

Mararka qaarkood, shaqaalaha ayaan isku diiwaangelineyn habka lacagta ee ILSP. Sababtu waxay noqon kartaa hab ah dalka oo dhan ama intarnetka. Haddii aad aqoonsan weydo shaqaale u diiwaangashan ILSP, lacagcelin ayaa loo sameyn karaa mar dambe.

Lacagcelintu waa **keliya** marka wax la soo iibiyo; lacagcelinta marna **laguma** bixin karo adeegyada shaqaalaha.

Haddii aad wax ku soo iibsaneyso hab ah lacagcelin, waa in aad buuxiso foom ah lacagta koontada tooska ah oo waa in waxaas lagu dhex qoro qorshaha adeegga. Waxba ma soo iibsan kartid ilaa aad Premier ka hesho waraaqda oggolaansho iibsiga.

Markaad wax soo iibsato ka dib, waa in aad Premier u soo gudbiso foomka lacagcelinta iyo koobbi ah caddeyn oo aad ugu sharxeyso. Lacagta waxaa lagugu siin doonaa jadwalka lacagbixinta ee barta intarnetka ee Premier. Waxay qaadan kartaa ilaa hal bil in lacagta laguu soo celiyo.

Dadka barnaamijka keliya, wakiilkooda haysa oggolaanshaha qareenka, ama masuul ayey ILSP lacagcelinta u sameyn kartaa.

## Diiwaangelinta Premier, xafiiska maamulka ama saddexaad

Qorshaha adeegga marka ay ADRC u soo gudbiso Premier Financial Management Services, Premier ayaa la socodsiin doonta shaqaalaha si la loogu sharxo sida loo soo gudbiyo waraaqaha qaansheegadka lacagbixinta. Shaqaalaha waxay habraaca ILSP kala shaqeyn doonaan Premier, uma baahna ADRCs. Premier waxa keliya oo uu bixinayaa qaansheegadka qeybta ka ah qorshaha adeegga ee qoran.

## Iskuduwidda shaqada adeegyada

ADRC waxay qorshaha adeegga u soo gudbin doontaa Premier si loo eego oo loo oggolaado. Premier ayaa dib u eegi doonta qorshaha si loo xaqiijiyo in liiska shaqaalaha uu ka soo baxayo shuruudaha ceymiska oo loo dejiyay in lagu soo gudbiyo qaansheegashadka lacagbixinta.

Waxaa la helayaa oggolaansho qoraal ah marka Premier yeelo wax ku qoran qorshaha adeegga. Ogeysiisku waa taariikhda bilowga ilaa dhammaadka wax ama adeeg ku qoran qorshaha oo la oggolaaday. Haddii adeeg ama wax aan la oggolaan, ADRC ayaa kugu caawineysa qorista qorshe kale.

**Ha sameyn wax qabanqaabo ah** oo shaqaale idin dhex mara **ka hor inta aan la helin oggolaanshaha Premier oo ah** in wax ama adeeg la oggolaaday. Waraaqad ah tusaale oggolaansho ka eego Lifaaqa C.

Marka wax ama adeeg ku qoran qorshaha adeegga la soo oggolaado, waxaad kala xiriiri kartaa shaqaalaha si aad ula sameysato jadwalka hawsha ama adeegyada. Waa in aad adeegbixiyaha u sheegto haddii aad joojineyso ama u qabaneyso ballan kale.



# La-socosho

## Ogaanshaha miisaaniyadda

Dadka barnaamijka ku jira iyo ADRC waxay heli doonaan warbixinta kharashaadka qorshaha adeegga oo ugu jira ILSP Connect Portal (Kadinkooda Intarnetka ILSP). ADRC ayaa kula soo xiriiri doonta haddii aadan isticmaalin maalgelinta qorshaha adeegga si loo hubiyo in aadan dhibaato kala kulmin jadwalka shaqaalaha daryeelka.

## Cusbooneysiinta qorshaha adeegga

Caawimaad ayaad uga codsan kartaa ADRC cusbooneysiinta qorshaha adeegga wakhti kasta inta lagu jiro markaad qeyb ka tahay ILSP. Ma cusbooneysiin kartid qorshaha adeegga adiga oo aan oggolaansho ka haysan ADRC. Qorshaha adeegga ee cusub waa inuu oggolaado Premier ka hor intaan adeeggu bilaaban.

## Taleefan laguu soo dirayo

ADRC waxay kula socon doontaa bilaha 2–3 iyo 5–6 ee diiwaangelinta si ay u xaqiijiso in aad helayso waxyaabaha iyo adeegyada qorshaha adeegga. Qof ka mid ah shaqaalaha ADRC ayaa kaa caawinaya sida aad wax uga qabaneyso caqabadaha adeegga.

Haddii baahiyadu isbeddelaan ama haddii uu isbeddel ku yimaado helitaanka adeegga, shaqaalaha ADRC ayaa kaala shaqeyn doona si loo cusbooneysiiyo qorshaha adeegga. ADRC waxay qorsheyaasha adeegga u soo gudbin doontaa Premier si ay u oggolaadaan. Waa in aad adigu ADRC kala soo xiriirto wixii su'aalo ah mar kasta inta lagu dhex jiro markaad qeybb ka tahay ILSP.

## Xiriirka dadku bilaabaan



ADRC waxaa ay taleefankaaga uga soo jawaabeysaa ilaa iyo saddex maalmood. Waxaad qabsan kartaa ballamaha la-socoshada ee ADRC sida markii loo baahdo oo ay kuu yihiin lagama maarmaan.

## Habraaca kalaguurka

Barnaamijka ILSP waa barnaamij wakhtigiisu xadeysan yahay. Qof u shaqeeya ADRC ayaa kaa caawin doona qorsheynta sida baahiyadaada ka dib marka ay dhammaado tijaabinta. ADRC waxay khadka taleefanka ama ballan aad u imaan doonto kaala hadli doonaan wakhtiga kalaguurka ee ILSP. Waxaad ka hadli doontaa baahi kasta oo jirta ama cusub oo ILSP wixii aad la kulantay waa in aad uga jawaabto daraasad ka dambeysa barnaamijka tijaabinta ah. Qof u shaqeeya ADRC ayaa kaa caawin doona in aad ogaato haddii aad xaq u leedahay in aad u gudubto barnaamij kale, sida barnaamijka daryeelka muddada-dheer ee Medicaid oo si guud loo maalgeliyo ama barnaamijka taageerada daryeelbixiyaha qoyska. Waxa aad filan karto waa wakhtigii kalaguurka barnaamijka ILSP ka hor bishaada tobnaad intii aad barnaamijka ku jirtay.

## Dhammaadka barnaamijka

Barnaamijku wuuxuu dhammaan doonaa 12 bilood laga bilaabo taariikhda diiwaangelinta hore ama marka la isticmaalo lacagaha barnaamijka ILSP. ADRC ayaa kuu soo diri doonta waraaq ku ogeysiineysa marka barnaamijku dhammaado.

## Ka-saarista diiwaangelinta

Qofkii aan xaq u lahayn waa lagaa saarayaa barnaamijka ILSP sababtoo ah:

- Waa qof ku jira ee barnaamijka daryeelka muddada dheer ee Medicaid.
- Waa qof u sii guuray goob aqoonsi ama leysan ku haysata daryeel oo deegaan ah.
- Waa qof ka guuray ADRC deegaankeeda shaqada.
- Waa qof ay ka war heli weyday ADRC*.
- Waa qof geeriyooday.

*Ka-saarista waxaa keeni karta qofka aan laga warhelin oo aan ka qeybqaadan adeegyada loo hayo ee qorshahiisa adeegga ee ILSP iyo marka uusan qofku u soo jawaabin ADRC oo la soo xiriirtay saddex jeer ama ka badan ilaa iyo laba bilood. ADRC waxay masuul ka tahay in ay la xiriirto dadka iyo shaqaalaha qorsheynaya adeegyada si ay u xaqiijiyaan adeegyada la qabtay ama haddii aan la qorsheyn ka hor inta aan dadka lagaa saarin barnaamijka.

Haddii lagaa saarayo barnaamijka ILSP, ADRC waxa ay:

- Buuxinayaan waraaq ah foomka Ka-saarista Barnaamijka ILSP.
- Kuu soo dirayaan waraaqda taariikhda ka-saarista iyo faahfaahinta sababta lagaaga saaray barnaamijka ILSP.
- Ogeysiinta Premier ee ka-saarista. Premier ma oggolaan doonaan kharashaad ah adeegyo ka dib marka barnaamijka lagaa saaro.
- In la bixiyo talooyin si wax looga qabto baahi kasta oo soo jirtay iyadoo la adeegsanayo isla habka kalaguurka ee kor ku qoran, sida daraasadda ka dambeysa barnaamijka, dibu-qiimeyn baahiyada waxqabsiga, iskudubaridka siigudbinta, iyo fursado ah talabixin.

# Codsiyada Kordhinta Wakhtiga Diiwaangelinta

Haddii aad ku isticmaali weydo qoondada lacagta oo ah $7,200 ilaa hal sano, waxaad ka codsan kartaa ADRC in laguu kordhiyo ilaa saddex bilood si aad u isticmaasho maalgelinta soo harta.

Codsiyada kordhinta waxa ADRC loo soo gudbin karaa wakhti kasta ka hor dhammaadka 12ka bilood ee wakhtiga barnaamijka. Kordhinta lama oggolaan karo ka dib markay dhammaato maalgelinta. ADRCs waxay bixin kartaa kordhin ah saddex bilood, ama kordhin ah ilaa 31ka Maaj, 2025, hadba kii soo dhawaada. Si wax laguugu oggolaado, waa inaad haysato qorshe aad ku isticmaaleyso maalgelinta inta ka harsan ee ah muddada la kordhiyey. Ma jireyso maalgelin dheeraad ah oo barnaamijka laga helayo oo ka baxsan gunnada $7,200.

# ILSP Connect Portal (Kadinka Intarnetka ILSP)

## Waa in ay dadku arkaan

Markaad ku jirto barnaamijka ILSP, waxa laguu diyaarinayaa online portal (kadin ah intarnetka) ah si aad ugala socon karto miisaaniyadda iyo qaansheegadka adeegyada. Fadlan Portal (Kadinka intanetka) kala xiriir Premier walaaca aad kaqabto qaasheegadka. Premier ayaa kuu haya macluumaad ku saabsan sida loo galo iyo sida loo isticmaalo ILSP Connect Portal (Kadinka Intarnetka ILSP). Haddii aad ku qanci weydo sida aad u isticmaaleyso portal (kadinka), waa in aad la xiriirto Premier ama waa in aad caawimaad ka codsato ADRC.

## Isticmaalidda ADRC

ADRCs waxay isticmaaleysaa ILSP Connect Portal (Kadinka ILSP Connect) si ay dib ugu eegaan macluumaadka dadka ku jira ILSP ee deegaankooda. ADRCs waxay arkayaan miisaaniyadda dadka iyo qaansheegadka shaqaale kasa oo u adeegay.

## Helitaanka shaqaalaha

Shaqaalaha, oo ay ku jiraan ururrada iyo NPPs, waxay geli karaan ILSP Connect Portal (Kadinka ILSP Connect) si ay u eegaan xaalka qaansheegad kasta. Shaqaalaha oo keliya ayaa eegi doona macluumaadka qaansheegad kasta. Ma arki karaan qorshaha adeegga ama miisaaniyadda.

# Qiimeynta Barnaamijka ILSP

Dadka ku jira ILSP waxay ka jawaabi doonaan daraasad ka hor intaysan sameyn diiwaangelinta ILSP iyo mar kale oo ah dhammaadka barnaamijka ILSP. Daraasaduhu waxay shaqaalaha ADRC ku caawinayaan inay ogaadaan baahiyada dadka oo waxaa macluumaadka helaya DHS si ay ugu qiimeeyaan guulgaarista ILSP. Waxa laga yaabaa in uu kula soo xiriiro qof ka socda Jaamacadda Wisconsin si aad ugu sheegto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan wixii aad la kulantay. Fadlan si degdeg ah uga soo jawaab codsiyada. Jawaabahaaga DHS ayaa ku heleysa macluumaad muhiim ah oo ku saabsan sida ugu fiican ee uu barnaamijka ILSP u daboolay baahiyadaada.

Haddii aad wax su'aalo ama walaac ah ka qabto qiimeynta barnaamijka ILSP, fadlan kala xiriir ADRC.

# Cabashada iyo Dacwooyinka

Dadka ku jira barnaamjka ILSP, waxay xaq u leeyihiin adeegyo ay tayadoodu aad u fiican tahay. Haddii aad cabasho ka qabto waxyaabo aad kala kulantay barnaamijka, fadlan si toos ah u soo weydii xafiisyada hoose.

- **ADRC**: Cabashada ama dacwooyinka ku saabsan adeegyada ADRC waa in lagu xalliyo sharciyada cabashada iyo dacwoyinka ee ADRC. ADRC waxay koobbi kaa siin doontaa sharciyada cabashada iyo dacwooyinka ee xafiiskooda.
- **Premier**: Cabashada ama dacwooyinka diiwaangelinta shaqaalaha habraacooda dacwada waa in loo gudbiyo Premier.
- **Shaqaalaha**: Cabashada ama dacwooyinka laga qabo shaqaalaha waa in loo raaco sharciyada xafiiska u qoran ee cabashada iyo dacwooyinka.
- **NPP**: Cabashada iyo dacwooyinka ku lugta leh NPP waa in si toos ah loogu gudbiyo NPP. Waxaad iska joojin kartaa xiriirkaaga heshiiska NPP oo waxaad soo diyaarsan kartaa shaqaale cusub.

Barnaamijka ILSP ma sameeyo maareynta kiiska oo ma kormeero ama lama socdo bixinta daryeelka loo qabto dadka ee barnaamijka. Haddii aad dareento in caafimaadkaaga ama badqabkaagu uu khatar ku jiro, waa in aad caawimaad degdeg ah u raadsato mid ka mid ah goobaha soo socda:

- Saldhigga booliiska deegaanka
- Adult Protective Services (Adeegyada Difaacidda Dadka Waayeelka): (dhs.wisconsin.gov/aps/)
- Wisconsin Elder Abuse Helpline (Khadka Caawinta Xadgudubka Waayeelka): (reportelderabusewi.org/) ama 1-833-586-0107

# Ka-hortegidda Takrifalka Miisaaniyadda iyo Lunsashada Lacagta

Qofka ku jira ILSP, masuul ayuu ka yahay maareynta miisaaniyadda iyo in aan lacagta la lunsan.

Haddii aad ka shakiso in mid ka mid ah shaqaalaha uu lacag lunsanayo, u soo sheeg Department of Health Services (Waaxda Adeegyada Caafimaadka) Office of the Inspector General (Xafiiska Kormeeraha Guud) adigoo isticmaalaya barta soosheegidda lunsiga lacagta (www.dhs.wisconsin.gov/fraud) ama taleefankooda lacag la'aanta oo ah 1-877-865-3432.

Tusaaleyaasha lunsiga lacagta:

- Qof shaqaale ah ayaa soo gudbin kara saacado ka badan intii saxda ahayd.
- Qof shaqaale ah ayaa soo gudbisan kara kharashaadka adeegyo aysan kuu qaban.
- Qof shaqaale ah ayaa soo dirsan kara qaansheegadyo badan oo isku saacado ah.
- Qof soo codsanaya in uu noqdo shaqaalaha aan ahayn xirfadlaha ayaa sheegan kara macluumaad been-abuur ah marka ay kuu socoto habraaca lagugu soo baaranayo.

Department of Health Services (Waaxda Adeegyada Caafimaadka) eedeymaha lacagaha la lunsanayo oo dhan waa ay ka sal gaaraan. Eedeymaha lunsashada lacagta waxaa loo diri karaa Department of Justice (Waaxda Cadaaladda) si ay baaris ugu sameeyaan. Qaansheeg kasta oo been-abuur ah oo la saxiixo waxa uu noqon karaa khiyaamo gaar ah, sidaas awgeed waa in aad qaansheegyada iska hubiso ka hor intaadan saxiixin.

# Shuruudaha iyo Hawlgalka ADRC

Shaqaalaha ADRC waxa ay u hoggaansami doonaan sharciyada iyo habraayada hoose ee ADRC inta ay maamulayaan barnaamijka ILSP.

## Xogdhowrid

Macluumaad kasta oo aad siiso ADRC waa xog la dhowrayo. ADRCs oo dhan waa in ay u hoggaansamaan shuruudaha gobolka sida ku qeexan Sharciga iyo Habraacyada Xogdhowridda (dhs.wisconsin.gov/publications/p02923-06.pdf).

## Xadeynta iyo joojinta adeegga guud ee ADRC

ADRC waxay xadeyn kartaa ama joojin kartaa adeegyada dadka iyada oo u cuskaneysa sharciyada gobolka ee ku qeexan Sharciyada Xadeynta iyo Joojinta Adeegga (dhs.wisconsin.gov/publications/p02923-08.pdf). Sharcigan waa mid guud ahaaneed oo aan gaar ku ahayn barnaamijka ILSP.

## Helitaanka adeegyada waxqabadka dhibaatada ama xaaladaha degdegga ah

ADRC waa in ay raacdo sharciyada gobolka ee adeegyada gurmadka iyo in dhibaato wax laga qabto, sida ku qeexan Helitaanka Adeegyada Waxqabadka Gurmadka ama Dhibaatada (dhs.wisconsin.gov/publications/p03062-17.pdf).

# Meelaha Lala Soo Xiriirayo

## Sida Loola Soo Xiriirayo ADRC

Haddii aad su'aalo ka qabto diiwaangelinta, qorshaha adeegga, ama joojinta manfacaaga ILSP, kala xiriir xafiiska ADRC.

Barta intarnetka: dhs.wisconsin.gov/adrc

## Sida loola xiriirayo maamulka xafiis kale oo saddexaad

Haddii aad adiga ama shaqaalaha su'aalo ka qabtaan kharashaadka ama lacagbixinta, la xiriira maamulka xafiiska kale ee saddexaad, Premier Financial Management Services.

Barta intarnetka: premier-fms.com/forms/wisconsin/ilsp

Su'aalaha iyo gudbinta dacwooyinka:

- Taleefanka: 888-890-2286
- Boostada Intarnetka: ilspclaims@premier-fms.com
- Fakiska: 877-334-2619

Su'aalaha iyo gudbinta foomamka:

- Taleefanka: 888-890-2286
- Boostada Intarnetka: ilsphr@premier-fms.com
- Fakiska: 877-334-2584

Su'aalaha guud:

- Taleefanka: 888-890-2286
- Boostada Intarnetka: ilsp@premier-fms.com

## Sida Loola Soo Xiriirayo Wistech

Haddii aad su'aalo ka qabto helitaanka ama qiimaynta teknoolajiga ah caawinta, ugu horreyn kala xiriir xafiiska ADRC si laguugu sii gudbiyo. Haddii mar hore laguu gudbiyey Wistech, waxaad kala xiriiri kartaa wixii ah macluumaad waxtar kuu leh oo khuseeya qiimeyntaada.

- Barta intarnetka: dhs.wisconsin.gov/wistech
- Boostada Intarnetka: DHSWistech@dhs.wisconsin.gov

## Sida loola xiriiri karo shaqaalaha adeegga

Haddii aad su'aalo ka qabto jadwalka adeegyada, la xiriir xafiiska shaqaalaha adeegga. Sida loola xiriiri karo shaqaalaha adeegga waxaad ka heli kartaa qorshaha adeegga.

# Lifaaqa A: Ereybixinta Qoraalka

**Aging and disability resource centers (xarumaha tasiilaadka waayeelka iyo naafada ama ADRC):** Waa hay'ad kheyri ah oo ku hawlgasha heshiis ay kula jirto Department of Health Services (Waaxda Adeegyada Caafimaadka) si ay u bixiso adeegyo ku qeexan sharciga Wis. Stat. § 46.283(3), ama, haddii heshiisku qeyb ka yahay adeegyada ku qeexan sharciga Wis. Stat. § 46.283(3), oo ay buuxiyaan shuruudaha hawlgalka ee la xiriira adeegyadaas.

**Assistive technology (Tijnoolajiyada caawinta ama AT):** Waxaa ka mid ah wax kasta, wax ah qalab, barnaamijka shaashadeed, ama aalad casri ah oo loo isticmaalayo in lagu kordhiyo, lagu ambaqaado, ama lagu sii horumariyo waxqabsiga qof naafo ah ama uu waxqabsigu ka xadeysan yihiin.

**Baaritaanka danbiyada daryeelaha:** Waxaa marka la soo eegayo feylka dambiyada, sumcadda, iyo hantida daryeelbixiyaha ka hor intaan loo shaqaaleysiin shaqada daryeelka, badqabka, iyo nabadgelyada carruurta ama waayeelka.

**Qaansheegadka:** Qaansheegadku waa codsi lacagbixineed ee waxyaabo ama adeegyo loo qabtay qof ku jira barnaamijka ILSP marka la soo aqbalo ee uu oggolaado.

**Danaha labada dhinac:** Waa xaalad qof ama goob shaqo oo aan ahayn qofka loo adeegayo marka ay ku lug leeyihiin qorsheynta ama bixinta adeegyada qofka loo adeegayo iyadoo ay dan ugu jirto, ama ay suuroobeyso inay ka faa'iidayaan, go'aan gaar ah, natiijada, ama kharash.

**Baarashada danbiyada Qofka:** Waa marka la soo eegayo feylka danbiyada qof kol hore lagu soo xukumay.



**Independent Living Supports Pilot (Taageerada Tijaabinta Nolosha Madaxabannaan ama ILSP):** Waa barnaamij tijaabo ah oo ay maalgeliyeen American Rescue Plan Act (Sharciga Qorshaha Samatabixinta Mareykanka) oo waxaa loogu talagalay in lagu bixiyo muddo-gaaban taageerada waayeelka iyo dadka naafada ah ee ku nool deegaanka adeegga ADRC.

**Shaqaalaha guriga ee aan xirfadda ahayn ama non-professional provider (shaqaalaha aan ahayn xirfadlaha) (NPP):** NPP waa qof qandaraas ka haysta qof u qabanaya adeegyo.

**Xafiisyada ADRC:** Waa xafiis ADRC oo ay soo xusheen Department of Health Services (Waaxda Adeegyada Caafimaadka) si ay u sameeyaan waxbarista ILSP, diiwaangelin, iyo in loo dhiibo maalgelin bulshada deegaanka.

**Qorshaha adeegga:** Qorshaha adeegga waa liis ay ku qoran yihiin ILSP tasiilaadka iyo adeegyada xaqa loogu yeesho oo xafiis ah ADRC ayaa u doortay in ay u sii hagaajiyaan madaxbannaanida qof ama in uu qofku joogo gurigiisa. Qorsheyaasha adeegga waa inay si toos ah wax uga qabanayaan baahida waxqabsiga. Qorsheyaasha adeegga waa in ay oggolaadaan maamulaha xafiis kale oo saddexaad ILSP ka hor inta aan wax adeeg ah la bilaabin ama aan wax la soo iibsan.

**Maamulka xafiis kale:** ILSP ahaan, waa adeeg ah maareynta maaliyadeed oo xaqiijinaya aqoonta shaqada, waxay dadka u oggolaadaan qorshaha adeega, oo waxay bixiyaan lacagta alaabta iyo adeegyada la soo oggolaaday. Maamulka xafiiska saddexaad waxay sameeyaan kadin ah intarnetka ka-qeybgaleyaasha barnaamijka iyo ADRCs si ay ula wada socdaan miisaaniyadda ILSP, qorsheyaasha adeegga, iyo lacagaha qaansheegadka.

# Lifaaqa B: Noocyada Adeegayada

## Qeexid

Qaybtan waxaan taxaysaa adeegyada laga heli karo barnaamijka ILSP. Fadlan kala hadal adeegyada aad rabto in aad hesho xfiiska shaqaalaha ee ADRC.

| Nooca | Alaabo ama adeeg | Shaqaalaha qabanaya |
|---|---|---|
| Qeybtan waxaa lagu sharxayaa kooxda qabaneysa adeeg kasta ama keeneysa alaabta. | Qeybtan waxaa lagu sharxayaa nooca alaabta ama adeegga. | Qeybtan waxaa laga eegayaa nooca shaqaalaha la oggolyahay.<br>• ORG=Provider organization or vendor (ORG=Xafiiska shaqaalaha ama alaab-keenaha)<br>• NPP=Non-professional provider (Shaqaalaha aan ahayn xirfadlaha) |

## Noocyada adeegayada

| Nooca | Alaabo ama adeeg | Shaqaalaha qabanaya |
|---|---|---|
| Xaalka nolosha | Guriga in wax laga beddelo | ORG |
| | Caawimaadda adeegga guri-helidda | ORG |
| | Dhaqdhaqaaq—adeegyada dhexgalka bulshada | ORG |
| Taageerid | Lacagta la isugu celiyo taageerid ah dhexgalka bulshada | NPP |
| | Adeegyada talabixinta caafimaadka iyo dabiibka ee daryeelbixiyeyaasha (qof qoyska ka mid ah) | ORG |
| | Adeegyada talabixinta caafimaadka iyo dabiibka ee daryeelbixiyeyaasha (qof aan qoyska ahayn) | ORG |
| | Tababaridda hawlaha nolol-maalmeedka | NPP<br>ORG |
| | Cuntada—marka guriga la keenayo | ORG |
| | Cuntada—marka meel lagu soo cunteynayo | ORG |

| Nooca | Alaabo ama adeeg | Shaqaalaha qabanaya |
| --- | --- | --- |
| | Adeeg ah xasuusinta daawada, oo aan ahayn fool-ka-fool | ORG |
| | Adeegyada daryeelka shakhsiga ah | ORG |
| Taageerid | Nasinta adeegyada goob kale | NPP<br>ORG |
| | Nasinta adeegyada guriga ee qofka | NPP<br>ORG |
| | Taageerid daryeel guriga ah—hawsha guriga | NPP<br>ORG |
| | Taageerid daryeel guriga ah—noqoshada wehelka | NPP<br>ORG |
| | Taageerid daryeel guriga ah—hawlaha joogtada | NPP<br>ORG |
| | Adeegyada tabarista ee daryeeleyaasha tabarrucaadda ah | ORG |
| | Gaadiidka | NPP<br>ORG |
| | Kaarka gaadiidka | ORG |
| | Raacista gaadiidka | ORG |
| | Raacista gaadiidka ama kaarka qofka wehelka ah | ORG |
| Qalab kaalmo ah, aalad iyo sahay | Teknoolajiga caawinta—iibsasho | ORG |
| | Teknoolajiga caawinta (aan cusbeyn)—iibsasho | ORG |
| | Qalab dadka lagula hadlo—iibsasho | ORG |
| | Qalab koronto ku shaqeeya oo daawada lagala baxo—rakibaad | ORG |
| | Qalab koronto ku shaqeeya oo daawada lagala baxo—iinsasho | ORG |
| | Qalab koronto ku shaqeeya oo daawada lagala baxo—kireysashp | ORG |
| | Qalab koronto ku shaqeeya oo daawada lagala baxo—kharashka khad taleefan ah | ORG |

| Nooca | Alaabo ama adeeg | Shaqaalaha qabanaya |
|---|---|---|
| | Qalab koronto ku shaqeeya oo taageero ah (fiidiyow, dhaqaaqid, cod)—khidmad ah rakibaad iyo tijaabin | ORG |
| | Helista turjubaan | ORG |
| Qalab kaalmo ah, aalad iyo sahay | Personal emergency response system (Qalab kuugu yeeraya aambalaas ama PERS)—khidmad ah rakibaad iyo tijaabin | ORG |
| | Personal emergency response system (Qalab kuugu yeeraya aambalaas ama PERS)—khidmad adeeg oo ah bil kasta | ORG |
| | Personal emergency response system (Qalab kuugu yeeraya aambalaas)—iibsasho ah hal-mar | ORG |
| | Sahay caafimaad oo gaar ahaaneed—iibsasho | ORG |
| | Qalab caafimaad oo gaar ahaaneed—iibsasho | ORG |
| Adeegyo la xiriira daawada | Kulan dabiib beddiil ah | ORG |
| | Dabiibka daaweynta maanka | ORG |
| | Tababarka iyo macluumaadka qof ahaaneed—kulan shakhsiyeed | ORG |
| | Tababarka iyo macluumaadka qof ahaaneed—kulan kooxeed | ORG |
| | Adeegyo ah talabixin iyo dabiibid | ORG |
| | Adeegyo ah talabixin iyo dabiibid oo ah teendho habeen la soo joogayo | ORG |
| | Adeegyo ah talabixin iyo dabiibid ah sahayda ama kharashka | ORG |
| | Xiisad jirdhisid ah | ORG |
| | Khidmadta xubinimada naadiga caafimaadka | ORG |
| | Khidmadta xubinimada naadiga caafimaadka | ORG |
| | Khidmadta xubinimada naadiga caafimaadka—bilaabista | ORG |

| Nooca | Alaabo ama adeeg | Shaqaalaha qabanaya |
|---|---|---|
| | Dabiibka masaajada | ORG |
| | Kulanka talbixinta nafaqada | ORG |
| | Dabiibka waxqabsiga jirka ee guriga qofka | ORG |
| | Dabiibka jimicsiga jirka ee guriga qofka | ORG |
| | Teendhadamadadaalada ama maalinta dadweynaha | ORG |
| | Kulanka dabiibka dhawaaqa hadalka | ORG |
| | Kulanka talabixinta maareynta miisaanka jirka | ORG |
| Adeeg maalmeed | Xarunta dadka waaweyn | ORG |
| | Xarunta dadka waaweyn ee adeegyada gaarka ah | ORG |
| | Addegyada maalintii ee bulshada gudaheeda | ORG |
| | Adeegyada maalintii ee xarun gudaheed | ORG |
| Shaqa-helid | Taageerada shaqa-helidda ee hab gaar ah (1 ilaa 2 qof) | NPP<br>ORG |
| | Taageerada shaqa-helidda—koox (3 ilaa 8 qof) | ORG |
| Wax kale | Teknoolajiga caawinta ama qiimeynta isticmaalka | ORG |
| | Adeegyada maareynta maaliyadda | ORG |
| | Alaabta iyo adeegyada qofku dalbanayo | NPP<br>ORG |
| | Adeegyada sharciga | ORG |
| | Tageerada adeegyada dallaalka | ORG |
| | Gaadiidka wax laga beddelayo | ORG |

# Lifaaqa C: Tusaalaha Waraaqda Ogolaanshaha

Fadlan ka eego bogga dambe tusaale ah waraaqda oggolaanshaha ee Premier.

**Premier** FINANCIAL MANAGEMENT SERVICES
Part of the AssuranceSD family

info@assuracesd.com
www.premier-fms.com/forms/wisconsin/ilsp/.com
10425 W North Ave
Suite 345
Milwaukee, WI 53226

Jimco, Maarso 29, 2024

Ku:

Recipient Name

Title

Shirkadda

Cinwaanka Jidka

Magaalada, Gobolka, Lambarka Boostada Deegaanka (Zip)

Waad salaaman tahay ABC Transportation

Waraaqdan waa xaqiijin ah in **ABC TRANSPORTATION** laguu oggolaaday adeeg(yada) soo socda:

| Magaca Qofka | Taariikhda Bilaabista | Taariikhda Kama-dambeysta | Faahfaahinta Adeegyada | Lambarka Adeegga | Beddelaad | Wakhtiyada | Inta jeer | Sicirka lacagta | Qeybaha Shaqada |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | | | | | | |

Cabashada dhammeystiran waxaa la socda macluumaad kasta oo kor ku qoran oo ay ka muuqato taariikh kasta oo adeeg la qabtay. Intaa waxaa dheer, fadlan qaansheegadka soo raaci magac Shaqaale iyo EIN Shaqaale. Lambarka qaansheegadka waxaa loo isticmaalaa si loola socdo laakiin looma baahna.

Sidoo kale lifaaqa waraaqahan la socda waa:

**PFMS ILSP NPP/Jadwalka Lacagbixinta Iibiyaha** – Qaansheegad kasta waa in lagu soo gudbiyo taariikhda u qoran. Lacagta la soo gudbiyo taariikhd dambe waxaa la bixinayaa xilliga lacagbixinta dambe.

Premier
FINANCIAL MANAGEMENT SERVICES
Part of the AssuranceSD family

info@assuracesd.com
www.premier-fms.com/forms/wisconsin/ilsp/.com
10425 W North Ave
Suite 345
Milwaukee, WI 53226

**Tusaalaha Foomka Qaansheegashada PFMS ILSP** – Waa sida loo soo buuxiyo qaansheegadka.

**Foomka Qaansheegashada PFMS ILSP** – Foomkan waxaa loo sameeyay shaqaalaha aan qaansheegadkooda ku soo gudbiney habka loo diyaariyey. Foomkan qofna khasab kuma aha laakiin waxaa ku diyaarsan meelaha la buuxinayo.

Haddii aad ka qabto wax ah su'aalo, fadlan kala soo xiriir Ilsp@premier-fms.com ama soo garaac taleefanka 888-890-2286.

Mahadsanid,

PFMS ILSP Waaxdeeda waraaqaha HR